

Ardayda iyo Waalidiinta Dugsiga Sare ee Iskuulada Degmada Beaverton,

Arbacadii, gudoomiyaha gobolka Kate Brown ayaa ku dhawaaqday go'aanka ah in la xiro fasaladii la imaanayay inta ka harsan sanad dugsiyeedka. In kastoo in badan oo inaga mid ahi filayeen xaqiiqada, soo sheegistaas aad bey noo dhibaateysay waxayna aheyd mid saamayn badan leh. Tani waa warqad ay si wadajir ah u soo direen dhammaan maamulayaasha dugsiga sare ee Degmadda Beaverton. Waxaan ku mideysannahay oo naga go'an inaan siino war la fahmi karo dhamaan qoysaskeena.

Ardayda iyo shaqaalaha ayaa ah wadnaha iskuuladeena. Waan jecelnahay ardaydeena iyo asxaabteena mana sugi karno inaan nolosha ku soo celinno dhismayaasheena. Waxaan ognahay in barashada tacliinta u dheertahay, fursadaha ardayda u koraan bulsho ahaan; ka mid noqoshada kooxda; iyo quudinta maskaxda iyo jirka ay dhamaan ka dhacaan dugsiga. Way adkeyd in la arko taas oo waan weynay. Inta lagu jiro waqtigan, waxaa lama huraan ah inaan ku xirnaano ardaydeena iyo qoysaskeena. Si wada jir ah ayaan isku caawin doonaa midba midka kale si aan u fahamno waqtiyadan adag. Waxaan aaminsanahay in Waxbarashada Fog ay tahay hal wado oo ardaydaydeena looga caawiyo inay sii wadaan hormarka safarkooda aqooneed.

Wasaarada Waxbarashada Oregon (ODE) waxay bixisay tilmaamo ku aaddan labada bilood ee u dambeeya iskuulka oo ay tahay in dhammaan dugsiyada dawladdu raacaan. Waxay ku dareen qaabab u oggolaanaya looddadka dugsiga sare ku kasban karaan dhibcihii ugu haray dugsiga sare ee ay ku qalin jabiyaan lahaayeen. Marka la soo koobo, arday kasta oo looddadka sare ah oo qorshihii uu ku qalin jebinay ku socday markey aheyd Maarso 13-keeda wuxuu awood u yeelan doonaa inuu helo dhibco dheeraad ah oo ay ku qalin jabiyaan. Kuwii wax ka dhinaayeen waxay fursad u heli doonaan inay helaan dhibco dheeraad ah oo ay ku qalin jabiyaan. Dhammaan looddadka sare waxaa la xiriiri doonno, la-taliyayaashooda, Abril 30-keeda si ay ugala hadlaan qorshahooda shaqsiyadeed. Degmadu waxay kaloo daabici doontaa macluumaadka ku saabsan barnaamijyada gaarka ah sida IB, AP, iyo koorsooyinka Dual Credit.

Waan ognahay, marka la eego xaqiiqada jirta, inaan qaban karin wax badan oo xafladaha / dhacdooyinkii dhamaadka sanadka si aan ugu dabaaldegn looddadka sare, sidii markii hore loo qorsheeyay. Taasi waxba kama beddeleyso rabitaankeenna ah inaan aqoonsano oo u dabaaldegn fasalkan cajiibkaah ee 2020. Waxaan wadnaa qorsheyaal sida dib udhigista qalin-jabinta, haddii tilmaamaha kala-sikashada bulshada ay saamaxdo, ama qalin-jabinta nooc qadka ah. Intaas waxaa sii dheer, waxaan dib u fiirineynaa dhamaan dabaaldegyadii sannadka waxaana raadiney habab cusub oo hal abuur leh oo ay ku dhici karaan.

Waqtigaan, waxaan horay ugu soconnaa qorshooyinka barashada fog ee Wajiga 3. Dhammaan ardayda fasallada 9aad, 10aad, iyo 11aad waxay sii wadan doonaan howshooda koorsada illaa dhamaadka sannad dugsiyeedkan. Macallimiintu waxay sii wadi doonaan qaabeynta fursadaha ka-qeybgalka si ardayda ay horumar ugu sameeyaan waxbarashadooda. Waxaan ku dadaali doonaa wax kasta oo suuragal ah si aan u hubinno in ardaydeenna aan wax dhibaato gaarin inta lagu jiro masiibada.

Salaan Diirran,

Matt Casteel, Aloha High School

Michael Crandall, Early College High School

Todd Corsetti, Mountainside High School

Andrew Cronk, Beaverton Academy of Science and Engineering

Anne Erwin, Beaverton High School

John Huelskamp, Sunset High School

David Nieslanik, Southridge High School

Jill O'Neill, International School of Beaverton

Bjorn Paige, Arts & Communication Academy

Matt Pedersen, Westview High School

Rachel Sip, Merlo Station High School